

Dalabka taxiga “FPA taxi”

Haddii xanuun dartii ama aadan tegi karin waax caafimaad, sida cisbitaal ama rug caafimaa, aadan qaadan karin gaadiidka magaalada ama gobalka waxan dalban kartaa taxiga FPA-taxi. Haddii xaaladaada caafimaad (sida cudur ama naafo) keenayaan inaad qaadato taxiga FPA-taxi waxad u baahan tahay inaad caddeyn ka wadato hey’adaha daryeelka iyo caafimaadka.

Dalab

- Si aad u dalbato taxi FPA taxi waa inaad wacdaa telefoon lambarka 0600 399 411 (lacagta wicitaanka waa 1,49 euro + qarashka caadiga ee wacitaanka)
- Dalbo taxi-ga intaan la gaarin saacadda 14.00 maalin ka hor booqashadaada goobta daryeel, haddii ay suura gal tahay
- Markaad wacdo xarunta dalabka waxa lagaaga baahan yahay warbixintan soo socota:
 - Magacaada
 - Warbixintaada shaqsi
 - Adareeska taxi-gu kaa qaadayo
 - Meeshaad u socoto (sida HVC ama cisbitaa)
 - Saacadda aad dooneyso inaad goobt caafimaad gaarto (waa inaad waqti hore tii tagtaa markaad tegeyso si aadan ug daahin qeybta aad booqaneyso)
 - wixi qalab gargaara aad u baahan tahay inaad isticmaasho (sida gaariga curyaanka)
 - warbixinta qofka kula socdo (waxad kaxeysan kartaa qof haddii caafimaadkaadu sababay)
 - telefoon lambar ee lagaa heli karo arimaha safarka
- Waxad dalban kartaa safar sii socod iyo soo noqosho haddii aad og tahay marka booqashadu kuu dhamaaneyso
- Waa inaad sheegtaa sababta aad ugu baahan tahay balansiga taxiga. Sida haddii aadan bas ku tegi karin waaxda caafimaad.
- Markaad soo wactanto ayaad ogaan doontaa waqtiga gaarigu kuu imanayo.

Taxiga

- Taxiga waa inaad tusisaa kaarkaada FPA.
- Waxa qasab kugu ah inaad bixiso 25 yuro halki safarba (50 yuro sii socod iyo soo noqosho)
- Waxa dhici karta inaad dad kale la raacdo gaariga maadaama FPA ay sidaa u abaabulaan safarada haddii ay macquul tahay.

Haddii ay wax iska bedelaan safarkaada aad gaariga u dalbatay ama aadan u baahan gaariga waa inaad taa sida ugu dhaqsaha badan leh ugu sheegtaa xarunta dalabka. Shirkadda taxiga waxey kugu soo dalaci kartaa qarashka safarka haddii aadan adiga dalbaday safarka aadan baajin taxiga.

Lacagta ugu sareeysa ee qeybta qofku caymis ahaan u bixinayo waa 300 yuro sanadki. Haddii lacagta ceymis ahaanta la bixiyo ay dhaafot 300 yuro waxaad heleysaa kaar lacag la’aan ah inta ka hartay sanadka. Kaarkaa waa inaad tusisaa darawalka si aad lacag la’aan gaariga ugu raacdo.